# Qaabka maareynta maqnaanshaha ee waxbarashada aasaasiga ah ee magaalada Jyväskylä

Mas'uulka waxbarashada waxaa uu ka hortagaa maqnaanshaha ardayga isla markaana si nidaamsan ula socdaa, ku farageliyaa una dabagalaa. Waxaa kale oo yimid in mas'uulku uu ogeysiiyo waalidiinta ama mas'uulka sharciga ah ee ardayga haddii ay dhacdo maqnaasho aan la oggolayn. (POL 26 §)

Carruurta sida joogtada ah u deggan Finland waa ku waajib in ay waxbartaan. Waalidku wuxuu leeyahay waajib sharci ah in uu hubiyo in ardaygu dhammeeyo waajibaadka waxbarashada. (OVL 2 § iyo 9 §)

Maqnaanshaha ardayda waxaa la tixgeliyaa dhamaan sannadka waxbarashada, xitaa maqnaanshaha la oggolyahay. Maqnaanshaha waxaa si nidaamsan loo daba-galaa; kooxdiisa wadajirka ah ee daryeelka ardayda ayaa afar jeer sannadka ka qabata.

## 1. Ka hortagga maqnaanshaha iyo taageerada imaanshaha

### Hawlgallo taageera nolol-wanaagga, ka-qaybgalka iyo midnimada bulshada iskuulka

- Xoojin xirfadaha dareenka, amniga iyo is-dhexgalka ardayda iyo shaqaalaha.
- Shaqaaluhu waxay si gaar ah ula kulmaan ardayda waxayna taageeraan sida ay ardayda uga go'an tahay iskuulka iyaga oo xoojinaya habaynta waxbaridda iyo taageerada koox-gaar ah ee taageerta shuruudaha waxbarashada.
- Shaqaaluhu wuxuu taageeraa is-dhexgalka kooxaha iyo xiriirada iskuulka si loo yareeyo kelinimada.
- Bulshada iskuulka oo dhan waxay ka shaqeysaa abuurista jawiga waxbarashada oo ammaan ah, iyadoo ka hortagaysa rabshad, cagajuglayn, xadgudub iyo takoorka.
- Shaqaaluhu wuxuu dhisaa wada-shaqaynta firfircoon oo u dhaxaysa guriga iyo iskuulka.
- Maqnaanshaha ardayda waxaa si nidaamsan loogu daba-galaa heer shaqsi iyo koox, qayb ka ah qorshaha wadajirka ah ee daryeelka ardayda.

## 2. Faragelin degdeg ah oo lala sameeyo ardayga iyo waalidiinta

- Isbedello aan caadi ahayn oo ku yimaada hab-dhaqanka ardayga
- Diidmada imaatinka iskuulka
- Daahitaanno soo noqnoqda
- Bixista xiisadda inta lagu jiro ama maalinta iskuulka
- Ardaygu iskuulka ayuu joogaa, laakiin fasalka kuma jiro
- Maqnaansho aan la oggolayn
- Maqnaansho aan lahayn sharaxaad ama shuruudaha aan buuxinayn

- Maqnaanshaha soo noqnoqda ee isla mawduuca ama maalmaha qaarkood ee toddobaadka
- Maqnaansho joogto ah iyo muddo dheer

## 3. Faragelinta hore 5%

- Macallinku wuxuu baaritaan kaga sameeyaa maqnaanshaha isagoo kala hadlayo ardayga iyo waalidka.
- Macallinku wuxuu daba-galaa horumarka waxbarashada, waxuu aqoonsadaa dhibaatooyinka waxbarashada, wuxuuna qiimeeyaa baahida taageerada.
- Marka la eego heerka ugu hooseeya, macallinku wuxuu la tashadaa macalinka waxbarashada gaarka ah iyo xirfadlayaasha adeegyada daryeelka ardayda haddii ay jiraan welwel ku saabsan wanaagga ardayga, waxbarashada ama aadista iskuulka.
- Macallinku wuxuu ardayga iyo waalidkaba la qorsheeyaa tallaabooyinka taageerada iyo waqtiga dib-u-eegista.
- Maqnaanshaha aan la oggolayn ama aan la sharixin waa in isla markiiba wax laga qabtaa.

## 4. Ficillada la bartilmaameedsaday 10-15%

- Macallinku wuxuu la xiriiraa waalidiinta oo codsadaa ogolaansho si loo qaban-qaabiyo koox xirfadlayaal badan leh oo ardayga taageera.
- Macallinku wuxuu la tashadaa macallinka waxbarashada gaarka ah iyo xirfadlayaasha adeegyada taageerada ardayda haddii loo baahdo.
- Macallinku wuxuu isugu yeeraa koox xirfadlayaal ah oo kala duwan haddii loo arko inay lagama maarmaan u tahay nolol-wanaagga, waxbarashada ama imaanshaha iskuulka.
- Kulanku wuxuu baari doonaa sababaha ka dambeeya maqnaanshaha wuxuuna xoojin doonaa qabanqaabada waxbarashada iyo noocyada taageerada koox-gaar ah ee taageera xaaladaha waxbarashada. Intaa waxaa dheer, hadafyada, cabbiraadaha taageerada iskuulka iyo guriga, qofka mas'uulka ah iyo taariikhda dib u eegista soo socota ee la isku raacay.
- Haddi aan lala kulmin kooxda xirfadlayaasha ah oo kala duwan, macallinku waxa uu ku heshiinayaa cabiraadda taageerada, la socodka, iyo ficillada la adeegsanayo ee bulshada ku salaysan ardayga iyo mas'uulka.

## 5. Ficillada adag 20%

- Baahida ardayga ee taageerada gaarka ah ee ardayga waxaa lagu qiimeeyaa qayb ka mid ah qorshaha hirgelinta taageerada gaarka ah ee ardayga.
- Macallinku wuxuu isugu yeeraa koox xirfadlayaal ah oo kala duwan. Haddii loo baahdo,hay'ado iskuulka ka baxsan ayaa lala tashanayaa.
- Macallimiinta iyo xirfadlayaasha adeegyada daryeelka ardayda waxay isla go'aansadaan la socodka sababaha maqnaanshaha iyadoo lala tashanayo ardayga iyo waalidiinta.
- Haddii qorshaha gaarka ah ee ardayga uu keeno go'aan ku saabsan taageerada, taageerada waxaa loo fulinayaa sida ku cad qorshaha.

- Qofka mas’uulka ah wuxuu ka shaqeeyaa hirgelinta tallaabooyinka taageerada ee lagu heshiiyey qorshaha wuxuuna xiriir la sii wadaa ardayga.
- Macallinku haddii loo baahdo, wuxuu sameyn karaa 1) wargelin sharci (sida sharciga daryeelka bulshada) si loo qiimeeyo baahida taageerada ama 2) wargelin daryeelka carruurta ah.

6. Haddii maqnaanshaha uu sii socdo

- Wada-shaqayn badan oo dhow ayaa la xoojinayaa.
- Haddii loo baahdo, waxaa la faahfaahinayaa baahida taageerada gaarka ah ee ardayga waxaana la cusboonaysiinayaa qorshaha hirgelinta taageeradaas.
- Qofka mas'uulka ah waxa uu u taageeraa ku soo laabashada ardayga si qorshaysan.

Maqnaanshaha 10% ayaa la muujiyay inay halis ku tahay nolol-wanaagga iyo waxbarashada.

Waxaa loo xisaabinayaa maqnaanshaha boqolley ahaan iyo saacado ahaan sannadka waxbarashada ee Jyväskylä

| HEERKA FASALKA | 5 % MAQNAANSHAHA | 10 % MAQNAANSHAHA | 15 % MAQNAANSHAHA | 20 % MAQNAANSHAHA |
|---|---|---|---|---|
| fasalka 1-aad ilaa 2-aad | 40 saacadood | 80 saacadood | 120 saacadood | 160 saacadood |
| fasalka 3-aad | 44 saacadood | 87 saacadood | 131 saacadood | 175 saacadood |
| fasalka 4-aad | 46 saacadood | 91 saacadood | 137 saacadood | 182 saacadood |
| fasalka 5-aad ilaa 6-aad | 48 saacadood | 95 saacadood | 143 saacadood | 190 saacadood |
| fasalka 7-aad ilaa 9-aad | 57 saacadood | 114 saacadood | 171 saacadood | 228 saacadood |

Ogeysiiska maqnaanshaha ee automatic-ga ah ee Wilma waxaa loo diraa iyadoo la raacayo xadka saacadaha ee ku qoran jadwalkan.